# Guddiga iswaafajinta Soo gudbinta Saxiixayaasha ee Qabya-Qoraalka Dastuurka

**23-05-2012, Addis Ababa, Ethiopia.**

**Qodabada wax laga badalayo**

1. Qodobka 3aad oo kusaabsan dowlada iyo diinta waxaa loo raray inuu doqdo Qodobka 2aad, halka uu qodobka 2aad oo kusaabsan mabaadiida Aasaasiga waxaa looraray loo rar qodobka 3aad.
2. Qodobka 2, qeybta 4aad, bogga 17aad ee qabyo-qoraalka oo ku saabsan dumarka. Waxaa loo qaatay sida uu ugu qoran yahay Dastuurka
3. Qodobada 48,49,50,51,52 ee qabya-qoraalka ee ku saabsan Xisbiyada siyaasadda. *"Dalku wuxuu yeelanayaa Xisbiyo siyaasadeed iyo doorsashooyin xor ah waxaana lagu habeyn doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo saaro baarlamaanka Federaalka"*
4. Qodobka 113aad, qeybta 1aad xarafka b oo uqoran (Xubin Golaha Shacbiga) waa in meesha laga saara, sidoo kale qeybta 2aadee ku saabsan shuruudaha doorashada Musharraxa Madaxweynenimada, waa in meesha laga saaraa. Xarafka d in lagu badalo " leh aqoon ama waayo-aragnimo u dhiganta xilkaas. Iyo in dhimirkiisu dhanyahay oo uunan galin dambi culus oo maxkamad xukuntay.
5. Qodobka 122aad faqraddiisa 4aad, waa in dib loo qoraa oo uu noqdaa: "Golaha wasiirrada wey ka imaankaraa Xubin golaha shacabka iyo xubin aan kamid ahayn Baarlamaanka" sidoo kale faqardda 2aad Ra'iisal Wasaare ku xigeen/kuxigeenno faqradda 3aad waa in xadididda laga saaraatiradagolaha Wasiirrada, faqradda 5aad hallagu badalo xil-baneynta Ra'iisul wasaaraha (

Soo jeedin Prof. Abukar in la caddeeyo sababaha banneynta xilka Ra'iisul-wasaaraha: Istiqaalo, Ka qaadid iyo Xilgudasha la'aan, Geeri)

6. Qodobka 123aad faqraddiisa 1aad Xarafka (a) waa in loo badalaa 40 sano, Xarafka c, ee ku saabsan jinsiyadda waa in meesha laga saaraa.
7. Magaca: Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
8. Qodobka 5aad: Afka rasmiga Jamhuuriyada Soomaaliya (Maay iyo Maxaatiri) Carabigu waa afka 2aad
9. Qodobka 6aad:Faqradda 3aad Hees qaran wey jirtaa, inta kale ee faqrada 3aad baarlamaanka ayaa sharci ka soo saarayo. Waxaa lagu kordhiyay faqrad kale oo ah Dowladaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka waxay yeelan doonaan calankooda iyo astaandooda u gaar ah si waafaqsan nidaamka federaalka
10. Qodobka 7aad: oo ku saabsan Dhulka Dowlada eekhilaafaadka Soohdimaha caalamiga ka dhasha in xallintooda loo maro tub nabadeed, iyo iskaashi waafaqsan qawaaniinta dalka u degsaniyo kuwa caalamiga ah. Waxaa lagu kordhiyay xaraf kale oo ah Qeexida jihooyinka xuduudaha Jamhuuriyada Soomaliya. Dhulka Dowladda hallagu badalo "Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed"
11. Qodobka 44aad ee ku saabsan Dhulka, Hantida iyo Deegaankawaan in lagu kordhiyaa *G)Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka waxay dajinayaan siyaasad -dhuleed oo heerkooda ah*
12. **Qodobada** 48-62 ee Dastuurka Qabyada ah ee ku saabsan shuruucda xisbiyada waxa loo raray in uu baaralamaanka Federaalka ah ayaa xeer ka soo saaraya
13. Qodobka 63aad ee ku saabsan Qaab-dhismeedka Dowladda, faqraddiisa 1aad xarfaha a, b iyo c waxaa lagu

badalay: qaab-dhismeedka Dowladdu waa laba heer oo kala ah:

A) Heerka Dowladda Federaalka iyo
B) Heerka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka oo ay hoos imaanayaan Dowladaha Deegaanka

14. Gobol gooni u istaagayo majiri karo. INTA GOBOL KALE KUBIIRAYO DOWLADDA FEDERAALKA AYAA MAAMULAYSA i

**14.** Qodobka 64aad ee ku saabsan tirada iyo xuduudaha Dowlad-Gobaleedyada iyo degmooyinka, sidiisa ayaa loo qaadanaya faqradaha 1,2,3,4, 5 iyo 6laakiin faqradda 1aad hallagu kordhiyo ereyga "CUSUB" oo noqonaya tirada iyo xuduudaha Dowlad-Gobaleedyada iyo degmooyinka cusub, waxaa go'aaminaya Golaha Shacabka.

**15.** Qodobka 67aad ee ku saabsanIskaashiga Dowlad-Gobaleedyada, weerta GUDDOOMIYEYAALKA Dowlad-gobaleedyada waa in laguna badalaa MADAXWEYNEYAASHA Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

**16.** Qodobka 68aad ee ku saabsan wada-xaajoodyada Caalamiga ah, weertafaqradda 2aad, ee " Dowladda Federaalka ah waa ay ku dari kartaa" ee waa in lagu badalaa "waxaa kaabaya wakiilo ka socda Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka "Faqradda 3aad ereyga Qowsaar hallagu badalo ILAALIYE

**17.** Qodobka 86aad iyo labadiisa faqradood ee 1 iyo 2 meesha waa in laga saaraa

**18.** Qodobka 87aad ee ku saabsanXilka Xeerdejinta Golaha shacabka xarafka c erayada *Golaha Wakiillada Dowlad Gobaleedyada*waxaa lagu badalay Golaha **Aqalka Sare**, sidoo kale waxaa meesha laga saarayaa xarafka d

19. Qodobka 88aad ee ku saabsan Tirada Xubnaha Golaha Shacabkafaqradda 4aad meesha ayaa laga saaray
20. Qodobka 93aad ee ku saabsantirada xubnaha ay shirarku ku ansaxayaan iyo go'aan gaarista Golaha Shacabka, waa in meesha laga saaraa waayo hab-raaca shaqadaiyo kalfadhiyada Golaha shacabka waxaa qeexaya Xeer-hoosaadka Baarlamaanka
21. Qodobka 96aad ee ku saabsan cinwaanka Xilka Xeerdejinta Golaha Wakiillada Dowlad Gobaleedyada waa in lagu badalaa XILKA XEERDEJINTA GOLAHA AQALKA SARE EE DOWLADDA FEDERAALKA, iyo meel kasta oo ay ku qoran tahay Wakiillada Dowlad gobaleedyada
22. Qodobka 97aad ee ku saabsan Tirada Xubnaha Golaha Aqalka Sare, xarafka c waxaa loo badalayaa TIRADA GUUD EE XUBNAHA GOLAHA AQALKA SARE WAA INEY METALAAN ISU DHEELLITIRANku yeeshaan DHAMMAAN QEYBAHA BULSHADA. Halagana saaro xarafka D
23. Qodobka 106aad ee ku saabsanHINDISE SHARCIYADEED ee saameynta ku laheyn Dowlad-Gobaleedyada faqradda 1aad xarafka (a) ereyga GUDDOOMIYO waxaa lagu badalayaa OGGOLAADO oo uu SAXIIXO.
24. Qodobka 107aad ee ku saabsan hindisa sharciyadeed oo saameyn ku leh heerka Dowlad-gobaleedyada faqradda 1aad xarafka (a) waxaa lagu darayaa in lagu ansixiyaa 2/3 oo ah aqlabiyadda Golaha Aqalka Sare
25. Qodobka 108aad ee ku saabsan Guddiga dhexdhexaadinta Baarlamaanka Federaalka waa in meesha laga saaro waayo dhexdhexaadinta waxaa iska leh Maxkamadda Dastuuriga
26. Qodobka 109 aad ee ku saabsanfaafinta iyo xafidaadda sharciyadda waxaa loo badalay WAXAA U XILSAARAN GARYAQAANKA GUUD

**27.**Qodobka 112 aad ee ku saabsanMadaxweynaha jamhuuriyadda faqradda 1aad waxaa lagu badalayaa MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**28.** Qodobka 115aad ee ku saabsan Xilka Awoodaha Madaxweynaha, faqradda *1aad waa in meesha laga saaraa.*

**29.Xilka iyo awoodaha Madaxweynaha**

AwoodahaMadaxweynaha :

1. Madaxweynaha wuxuu qaban doonaa xilal Dowladeedka soo socda.
   a. Furitaanka Golaha Shacbiga
   b. Wuxuu lahadlaa fadhiga gaarka ah ee Golaha shacabka sanadkiiba mar.
   c. Wuxuu lahadli karaa golaha Shacabka markasta oo kale
   d. Madaxweynuhu wuxuu magacaabayaa Gudoomiyaha Maxkamada dastuuriga, maxkamada sare, iyo garsoorayaasha kale soo jeedinta gudiga Adeega garsoorka kadib.
   e. Madaxweynaha wuxuu magacaabayaa jagooyinka sare ee Xukuumada iyo madaxda hay'adaha Dowlada marka uu soojeediyo Golaha Wasiiradda.
   f. Madaxweynaha wuxuu magacaabayaa jagooyinka Danjirayaasha, Qunsuliyadaha GUUD marka uu Golaha Wasiirada uu soo jeediyo.
   g. Madaxweynaha wuxuu qaabilaa Diblomaasiyiinta shisheeye iyo wakiilada qunsuliyadaha dalalka shisheeye.
   h. Wuxuu gudoonsiiyaa abaalmarinta xushmada Qaranka (State Honour) Marka Golaha Wasiirada soo jeediyaan.

   I Madaxweynaha wuxuu ku dhawaaqaa xaaladda deg degga ah iyo xaaladda dagaal.

   J. wuxuu yahay taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida,

K. wuxuuna magacaabayaa Taliyayaasha Ciidamada marka ay soo jeediyaan Golaha wasiirada

2. Madaxweynaha wuxuu kala diri karaa Golaha shacabka marka ay Mudadiisa xilka dhamaato si doorasho ay u aadaan.

3. Madaxweynaha wuxuu magacaabayaa, xilka ka qaadayaa wasiirka Koowaad ama kala dirayaa Xukuumada hadii ay weydo Codka kalsoonida Golaha Shacabka oo ah 50% +1
4. Madaxweynaha wuxuu xilka kaqaadayaa Wasiirada, Wasiiru Dowlayaasha iyo Wasiir kuxigeenada marka uu Wasiirka koowaad soo jeediyo.
5. Madaxweynaha wuxuu leeyahay awoodaha kale ee soo socdo
   A. Saxiixida heshiisyada caalamiga marka Golaha wasiirada uu soo jeediyo Golaha Shacabkana uu ansaxiyo.
   B. Ansixinta sharuucda Golaha shacbiga ogolaado si sharci looga badelo
   C. Xil kaqaadista saraakiisha Dowlada waxay ku imaanaysaa sidii markii hore lagu magacaabay.

30. *Qodobka 117aad* faqradda 1aad ereyga KAXAYUUBIN waxaa lagu badalayaa KAQAADID AMA WAREEJIN

31. Qodobka 125aad faqradaha c), d) iyo e) waxaa loo wareejinayaa qodobka 115aad

32. Qodobka 133aad eeku saabsan Nidaamka Maxkamadda Dalka, waxaa lagu badalay: " Garsoorku wuxuu noqonayaa laba heer oo ah heer federal iyo heer dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka waxaana ka dhaxeyneysa maxakamadda ugu sarreysa dalka oo heer federal ah iyadoo dowladaha xubnaha ka ah federaalka iyagoo yeelanaya maxkamad sare oo iyaga u gaar ah" qodobada 133-145 oo ka hadlaya garsoorka qaabdhismeedkiisa magacaabistiisa iyo shaqadiisa waxaa laga soo saarayaa xeer gaar ah

33. Qodobka 147aad ee ku saabsan Sameynta Guddiyada Madaxbannaan, waxaa lagu badalayaa" Waxaa jiri doona guddiyo madaxbannaan oo heer federal iyo heer dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka , waajibaadka, xilkooda iyo tiradooda waxaa lagu qeexayaa xeer gaar ah oo laga ansixiyo labada aqal ee baarlamaanka Federaalka ah. Iyadoo la tixgalinayo duruufaha gaarka ah oo guddiyadaas lo xilsaaray,

xubnaha ka qeybgalaayana waa in laga tashtaa iney ka qeyb qaataan dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka Soomaaliyeed.

***34.***Qodobka 149aad ee ku waxaa lagu kordhiyay WAA INUU LEEYAHAY AQOON IYO KHIBRAD LAXARIIRTA GUDDIGA LOO MAGACAABAY HOWSHA LOO MAGACAABAY, HOREYNA AAN U GALIN DAMBIYO MAXKAMADEED,

35.Qodobka 150aaad ee ku saabsan mudada xilka waa in meesha laga saaraa waayo xeerka lagu magacaabay ayaaa lagu caddeynayaa mudada xilka

36.Qodobka 151aad ee ku saabsan xil kaqaadis, waa in meesha laga saaraa: faqradaha 3 iyo 4 waayo waxay ka hor imaanayaan nidaamka garsoorka lamana sameyn karo maxkamad gaarka.

37. Qodobada 149-153 meesha waa laga saaray waxayna ku soo baxayaan xeer gaar ah.

38.Qodobka 154aad ee ku saabsan xafiisyada madaxabannaan, hallagu badalo WAXAA JIRAYA HEY'ADO MADAXBANNAAN OO AY YEELANAYAAN DOWLADDA FEDERAALKA IYO DOWLADAHA XUBNAHA KA AH DOWLADDA FEDERAALKA AH SIDA GARYAQAANKA GUUD, HANTIDHOWRKA GUUD, BANGIGA DHEXE OO NOQONAYO HEER FEDERAAAL.

39. Qodobka 159aad oo ku saabsan shaqaalaha dowladda ee rayidka ah, faqradda 2aad waxaa loo qorayaa "WAXAA JIRAYA SHAQAALAHA DOWLADDA EE RAYIDKA AH HEER FEDERAAL IYO HEER DOWLADAHA XUBNAHA KA AH DOWLADDA FEDERAALKA" waxaan soo baxaya xeer nidaaminaya

40.Qodobada 161-163aad oo kahadlaya arrimaha dastuurka federaalka dastuurrada dowladaha xubinta ka ah dowladda federaalka waa in la iswaafajiyaa mabda' iyan

41. Qodobka 180aad cinwaanku wuxuu noqonayaa BANGIGA DHEXE EE FEDERAALKA, faqradda 2aad ee ku saabsan Bangiga dhexe ee Federaalka waxaa lagu darayaa ' maaliyadda iyo LACAGTA" , waxaana la baabi'inayaa qodobka 181aad, waxaana la sameynayaa faqrad ka mid ah qodobka 180aad oo sheegeysa in Bangiga dhexe yahay KEYDKA QARANKA
42. Qodobka 187aad ee ku saabsan Hey'adda Gardoonka (Ombudsman)Waxaa laga saarayaa arrinka ciidanka hallaga saaro
43. Qodobka 188aad meesha waa laga saaray laguna caddeeyo sharciga ciidamada
44. Qodobada 189-197 waxaa lagu maamulayaa xeerar gaar ah oo laxiriira howlaha ciidanka

**Qodobada Dib loo dhigay:**

1. Qodobka 9aad: Arrinta ku saabsan Maqaamka (Status) Magaala Madaxda Muqdishu dib ayaa loo dhigay
2. **Qodobada 69aad-77aad: Kala Qeybinta Awoodaha** Awood qeybsiga siyaasadeed iyo dhaqaale waxaa kawada xaajoonaya Dowladda federaalka ah iyo dowlaha xubnaha ka noqonayo, marka laga reebo arrima ha Dibedda,Difaaca,Immigrationka iyo siyaasadda lacagta.
3. Qodobka 45aad ee Kheyraad dabiiciga dib ayaa loo dhigay**kawada hadalkiisa**
4. Qodobka 88aad ee ku saabsanTirada Xubnaha Golaha Shacabka waa 225 MPs Golaha shacabka iyo 54 oo ah Aqalka sare waxay ka imaanayaa 18ka gobolee Dalka ka koobnaa 1991kii ka hor.
5. Qodobada 164-179 iyo 182 oo kusaabsan Maaliyadda waxay ka mid yihiin qodobada dib loogu dhigay inay kawada hadlaan Dowlada Federaalka iyo Dowladaha XUBNAHA KA AH Dowlada FEDRAALKA.

Magacyada Saxiixayaasha

1 Shariif Sheekh Axmed

Madaxweynaha Dawladda Federalka KMG

2 Dr. Cabdiweli Maxamed Cali

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federalka KMG

3 Shariif Xassan Sheekh Adan

Gudoomiyaha Barlamaanka Dawlada Federalka KMG

4 Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamud "Farole"

Madaxweynaha Dawladda Puntland ee Somaliya

5 Maxamed Axmed Caalin

Madaxweynaha Dawlad Goboleedka GalMudug

6 Khaliif Cabdulqaadir Macalin Nuur

Ahlu-Suna Wal-jamaaca